

Qoraal la eegto habka loo isticmaalo codisga elektarooniga ah

Haddii aad ku leedahay aqoonsiga bangiga ama aqoonsiga Freja ee telefoonkaaga gacanta ama kumbiyutarka, waa inaad ka codsataa kaalmada dhaqaale adiga oo isticmaalaya kumbiyutarka, Ipadka ama telefoonka gacanta.

Sidan samee

1. Ku qor www.nykoping.se akhristaha websaydkaaga
2. Guji **Taageerada iyo daryeelka (Omsorg och Stöd)**
3. Aad/tag **Taageerada dhaqaale (Ekonomiskt stöd)**
4. Guji **Kaalmada dhaqaale (Ekonomiskt Bistånd)**
Halkan waxaad ka heli doontaa macluumaaad ku saabsan sida kaalmada dhaqaale u shaqayso iyo waxyaabo laga yaabo inay fiican tahay inaad ogado inta aanad codsigaaga samayn ka hor iyo waxa ay tahay inaad samayso codsigaaga kadib.
5. Guji Codsiga markii ugu horeysay.
6. Guji batanka buluuga ah ee **Codsiga adeegga elektaroonigga ah (Ansök via e-tjänst).**

Ansök via e-tjänst

7. Ka dooro sida aad u geleyso


- a) Aqoonsiga bankiga (BankID) isla aaladdaa
- b) Aqoonsiga bankiga (BankID) ee aalad kale
- c) Freja eID+

8. Gelii tobankaaga lambar (personnummer) oo guji OK

Haddii aad la dalbanayso xaaska/sayga/qof aad isla deggen tahihiin/qof aad lamaane tihiiin waa inuu marka hore galoo qofka sharciga u lehi, ama qofka ugu da'da weyn labadiina xiriirka isku jinsi ah lehi.

9. Fur aqoonsigaaga elektarooniga ah oo gelii koodka gaarka kuu ah

10. Guji codsi cusub



11. Buuxi goobaha bannaan dhammaantood Ku qor 0 meesha aanad ku lahayn dakhli ama kharash

12. Guji Kaydinaya

13. Tag bogga xaggiisa hoose oo guji **Ku xiga**

14. Hubi inaad ku buuxisay macluumaaad sax ah

15. U dhaadhac bogga xagga hoose, akhri oo guji saddexda khaanadood ee far geeska ah

- Jag är införstådd i mina rättigheter och skyldigheter. [?](#)
- Jag försäkrar att jag är införstådd i hur informationen jag delgett kommer att hanteras enligt gällande lagstiftning. [?](#)
- Jag försäkrar att all information är riktig och är införstådd med att uppgifterna kan bli föremål för kontroll.

[Tillbaka](#)

[Skriv ut](#)

[Skicka in](#)

16. Guji **Soo dir oo sug ilaa aad ka helayo xaqiijin ah in codsigii la diiwangeliyey**

- Jag är införstådd i mina rättigheter och skyldigheter. [?](#)
- Jag försäkrar att jag är införstådd i hur informationen jag delgett kommer att hanteras enligt gällande lagstiftning. [?](#)
- Jag försäkrar att all information är riktig och är införstådd med att uppgifterna kan bli föremål för kontroll.

[Tillbaka](#)

[Skriv ut](#)

[Skicka in](#)

17. Haddii aad si wadajir ah ula codsanayso xaaska/sayga/qof aad isla deggen tahihii/qof aad lamaane tiihin, hadda waa inuu qofkaasi galoo **Raadso kaalmada dhaqaale (masruufka taageerada) isagoo ku geleya aqoonsiga elektaroonigiisa (ha sameeyo qodobbada 1-6aad) kadibna haku ansixiyo codsiga isagoo:**

- a) Gujinaya **Sug oggolaanshahaaga**
- b) U dhaadhac bogga xagga hoose, akhri oo guji saddexda khaanadood ee far geeska ah
- c) Guji **Soo dir**